

Shaqada Dugsiga Sare ee Jefferson waa in la abuuro jawi waxbarasho oo leh iskaashi wada shaqeyneed oo loo wada dhan yahay oo si firfircoon u dhiirigeliya ixtiraamka loo hayo kala duwanaanshaha dadka waana mid u baahan wada shaqeyn iyo waxbarasho shakhsi ahaaneed. Ardayda Jefferson waxay si fican u diyaar garoobi doonaan in ay ka gudbaan caqabadaha jira, dejiyaan isla markaana gaaraan ujeedooyinka la leeyahay, wax ku biiriyaan bulshadooda isla markaana sii wadaan nidaamka barashada iyo horumarinta guud ahaan noloshooda.

Dugsiga Sare ee Jefferson-MCAS

Dugsiga Sare ee Jefferson ee Kulliyadda Dhexe ee loogu talagalay Waxbarashada Horumarsan wuxuu ardayda siiyaa fursad gaar ah oo ay si buuxda uga qayb qaataan waayo-aragnimadooda dugsiga sare isla markaana u bilaabaan shaqada koorso oo heer kulliyadeed ah, iyada oo loo diyaarinayo khibrado kala duwan oo ah dugsiga sare ka dib. Kulliyadda Dhexe waxay dhistaa aqoonta tacliimeed, caadooyinka, iyo xirfadaha u horseedaya in si guul leh loo dhammeysto koorsooyinka kulliyada inta ay ku jiraan dugsiga sare wuxuuna ardayda u diyaariyaa ardayda tacliinta sare iyo/ama tababar farsamo dugsiga sare ka dib. Dhammaan ardayda isqorta Jefferson waa ardayda Kulliyadda Dhexe. Waxaa laga filayaa in ay buuxiyaan shuruudaha looga baahan yahay shahaadada Kulliyadda Dhexe isla markaana kasbadaan ugu yaraan 12 oo ah credit-ka kulliyadd.

Taageerada loogu talagalay Dugsiga Sare iyo Guusha Kulliyadda waxay bilaabantaa marka lagu jiro fasalka 9-aad oo ay la qaataan Ardayda Sanadkii Koowaad Dugsiga Sare Dhiganaya. Ardaydu waxay afar ka mid ah sideedooda koorso la qaataan kooxo arday ah oo ay isku heer yihiin iyaga oo wadaagaya waayo-aragnimada dhanka Sayniska, Cilmiga Bulshada, Ingiriisiga, iyo koorso Diyaar u ahaanshaha Kulliyadeed. Waxa diirada la saarayo sanadkani waa xirfadaha wax akhriska iyo qoraal, wada shaqeynta iyo dhammeystirka wanaagsan ee shaqada koorso si ardaydu ugu diyaar garoobaan fasalka 10-aad isla markaana waqti ugu haysaan jadwalladooda fasallada 11-aad iyo 12-aad si ay ugu xirmaan PCC.

Qaar ka mid ah ardaydu waxay helaan ilaa hal sano oo ah credit-ka kulliyadda oo loo wareejiisan karo PCC. In ka badan \$100 credit-kiiba oo loogu talagalay waxbarashada, buugaagta iyo kharashyada, Kulliyadda Dhexe waxay ardayda u badbaadin kartaa boqolaal doolar haddiiba aysan ahayn u badbaadinaynin kumanaan doolar oo ah kharashyada tacliinta sare. Fasalkii 2015 wuxuu ahaa kooxdii ugu horeysay ee qalin-jabisay si ay Jefferson HS-MCAS u dhigtaan dhammaan afarta sano. Marka la isku daro waxay heleen ku dhawaad 1800 oo ah credit-ka kulliyadda.

Barnaamijka Self Enhancement Inc., Soo ah barnaamij dhallinyarada awoodsiiya oo aan faa'iido doon ahayn, ayaa tala bixin, waxbarid iyo taageero dhanka bulshada ah siiya ardayda Jefferson iyo qoysaskooda si uu uga caawiyo helitaanka iyo ku guuleysiga shaqada koorso oo heer kulliyadeed ah.

Gelitaanka Jefferson


Si aad u hesho Jefferson, bilow in aad booqoto Dugsi Helaha PPS www.pps.net/schoolchoice/Page/126, geli cinwaankaaga guriga oo hel dugsiga sare ee lagu qoondeeyay.

- **Haddii uu cinwaankaagu ku yaalo goobta laga imaanayo ee isku qoondeynta labada ah 'dual-assignment' ee Jefferson:** Ardayda fasallada 8-daad waxay leeyihiin gelitaan la hubo oo ay gelayaan Jefferson laakiin waa in ay foomka isku qoondeynta labada ah u soo gudbiyaan la taliyhooda dugsiga ka hor dhammaadka bakhitiyaanasiibka doorashadda dugsiga. Foomamka isku qoondeynta labada ah waxaa la soo geliyaa www.pps.net/Page/2343

- **Haddii cinwaankaagu ka baxsan yahay goobta laga imaanayo ee isku qoondeynta labada ah 'dual-assignment':** Codso inta lagu jiro bakhitiyaanasiibka doorashadda dugsiga ee Noofambar. Dib u eeg nidaamka bakhitiyaanasiibka isla markaana in lagu wareejiyo ka codso www.pps.net/Page/2343
- **Su'aalaha u dir PPS Enrollment & Transfer Center, 503-916-3205, enrollment-office@pps.net**

Dugisga Sare ee Jefferson • Kulliyada Dhexe ee Waxbarashada Sare

5210 N. Kerby St. Portland, OR 97217 | 503-916-5180 | <http://www.pps.net/schools/jefferson>



"PCC iskaashiga ay la leedahay Jefferson iyo SEI wuxuu ahaa maalgashi wanaagsan isla markaana abaalmarin leh labadoodaba marka la eego mustaqbalka bulshadan. In shaqada adag iyo dadaalka ardayda Jefferson laga arko hoolashayada casharka iyo fasallada waa mid muujinaysa awoodda waxbarashada si loo furo kartida buuxda ee qofka."

—Dr. Karin Edwards, Madaxweynaha PCC-Cascade Campus

Waxyaabaha muhiimka ah ee Dugsiga Sare ee Jefferson

- **Sayniska Caafimaadka/Tiknoolajiyada dhanka biology-ga:** Koorso wax lagu baranayo oo ay ku jiraan sayniska, xisaabta, xiirfada dhanka waxbarasho oo loogu talagalay in ardayda loogu diyaariyo isbedel guul leh oo ay ugu gudbaan waxbarashada dugsiga sare ka dib, tababar, iyo xirfadaha dhanka mustaqbalka oo ah dhanka sayniska, daryeelka caafimaadka, ama tiknoolajiyada dhanka biology-ga.
- **Warbaahinta Dhijitalka:** Ardaydu waxay bartaan sawarrada dhijitalka, muusikada, waxyaabaha uu ka kooban yahay website-ku, sawirrada iyo muuqaal u yeelida iyo isticmaalka xarumaha soo saarista warbaahinta fiidiyaha iyo istuudiyaha tayada leh ee Jefferson si loo soo saaro fiidiyow loogu talagalay ka baahinta website-ka iyo warbaahinta.
- **Labada Credit ah:** Koorsooyinka Labada Credit-ka ah 'Dual Credit' waxaa laga bixiyaa dugsiga sare waxaana la oggolaaday in la helo credit-ka kulliyadda iyada oo lagu saleynayo heerka kooxda iyo maadada. Marka la joogo Jefferson, Junior English, Jefferson Dancers, Advanced Art, Pre-Calculus, Math 105 iyo Writing 121/122 waa PCC-ga labada credit-ka ah 'dual credit' iyada oo Senior Inquiry uu bixiyo fursad lagu helayo credit-ka PSU.
- **Farshaxanka:** Aasaaska Istuudiyaha Farshaxanka, Sawir qaadida Qolka Madow iyo Dhijitalka ah, Dhoobada iyo Farshaxanka Horumarsan/Farshaxanka Labada Credit ah iyadoo la sii marayo PCC. Barnaamijyada talo siinta farshaxaniistaha, farshaxanka bulshada ku saleysan iyo farshaxaniistayaasha booqashada ku joogaa way kala duwan yihiin sanad kasta.
- **Qoob ka cayaarka:** Barnaamijka waxaa ku jira Qoob ka cayaarayaasha Jefferson ee caalamka laga yaqaan. Macallimiinta iyo isku dubaridayaaasha qoob ka cayaarka oo takhasus leh ayaa dhiga fasallo lagu baranayo farsamada qoob ka cayaarka. Qoob ka cayaarka horumarsan, oo ay ku jiraan Qoob ka cayaarayaasha Jefferson, waxaa looga baahan yahay shuruudo iyo laga qaado tijaabo dhanka meelaynta ah. Kooxdu waxay ku soo wareegtay Fransiiska 2015-kii iyo 2017-kii, Talyaaniga oo ay ku soo wareegeen 2011-kii, iyo Shiinaha oo ay ku soo wareegeen 2013-kii. www.jeffersondancers.org
- **Cayaaraha:** Kubadda kolayga, kubadda cagta maraykanka, kubadda cagta, softball-ka, cayaaraha fudud, dhiirigelinta kooxda, baseball-ka, orodka dheer, kubadda laliska, lagdinta, iyo dabaasha.
- **Hoggaaminta iyo Naadiyada:** Maamuuska Qaranka ee Bulshada 'National Honor Society'; Ururka Ardayda Madow, Naadiga Buugga 'Book Club'; Awoodsiiinta Haweenka 'Women's Empowerment'; Barnaamijka Sun ee Dugsiga 'Sun School Program'; Qalabka Iswada 'Robotics'; Buuga Sanadka 'Yearbook'; Tababarka Maxkamadeynta 'Mock Trial'; Isbahaysiga Dhanka Galmada & Jinsiga (SAGA), UNIDOS iyo kuwo dheeraad ah.



"Waxaan muddo dheer ku riyoonaayay kulliyad. Waxaan ku faraxsanahay in fursadan ay taalo halkan Jefferson. Waxaan noqonayaa qofkii u horreeyay ee goyskayga ka tirsan ee ka qalin-jabiya kulliyad."

—Chanelle Crittenden, oo 2015-kii ka qalin-jabisay, Jaamacada Willamette

Jidka loogu codso Kulliyada Bulshada ee Portland

- **Ardayda sanadkii koowaad iyo sanadkii labaad dhiganaysa dugsiga sare:** Xoog saarida maadooyinka muhiimka ah ee Jefferson iyo barashada xirfadaha cilmi-baarista iyo barashada si loogu diyaariyo in ay qaataan koorsooyinka kulliyadda. Ardaydu waxay u wareegaan fasallada iyaga oo kooxo ah – oo lagu magacaabo akademiyada – iyaga oo leh koox macallimiin oo isku mid ah, taasi oo ah istiraatiijiyad la xaqiijiyay oo lagu taageerayo guusha ardayga.
- **Ardayda sanadihii u dambeeyay dhiganaysa dugsiga sare:** Marka ay ardaydu diyaar noqdaan – wakhtiga ugu horreeya ee ay sanadkii labaad dhiganayaan dugsiga sare – waxay ku daraan koorsooyin ka jira PCC-Cascade Campus. Ardaydu waxay waqti hore buuxiyaan codsiga gelitaanka kulliyadda waxayna galaan imtixaanka meelaynta si loo go'aamiyo fasallada ku habboon.
- **Bixinta PCC:** Ardaydu waxay koorsooyinka badankooda ka heli karaan PCC laga soo bilaabo koorsooyin muhiim ah oo ardayda u diyaarinaya shahaado afar sano ah ilaa laga gaarayo shaqada koorso ee ujeedadeeda tahay dhanka xirfada ama ganacsiga oo ay ka mid yihiin EMT, kaaliyaha caafimaad, shaqaalaha dab damiska, iyo farsamo yaqaanka dhanka kuleyliyaha, nidaamka hawada iyo qaboojinta.
- **Taageerada PCC:** Marka lagu daro taageerada laga helo la taliyayaasha SEI iyo la taliyayaasha Jefferson, ardayda waxaa taageera shaqaalaha Kulliyadda Dhexe ee jooga PCC.